**Shirweynaha wada-tashiga iyo iscafinta Beelweynta Muddullood**

**War Murtiyeed.**
**Muq 03 –06 August 2020**

Beelweynta muddullood ayaa shir wada-tashi iyo iscafin ah ku yeelatay Magaalada Muqdisho
00 – 00 Luuliyo 2020. Shirkaan oo lagu qabtay Mowlaca Mocallin Nuur ayaa daba socday shir ka horreeyay oo lagu qabtay Muqdisho 23/02/ 2020 kaa soo lagu go'aamiyay qabashada Shirweyne beesha isugu timaado oo ay hoggaaminaayaan Duubabka Beesha.

Shirka wada-tashiga iyo iscafinta waxaa ka soo qeeyb galay ergo gaareeysa ilaa 5,000 (Shan kun) oo qof
oo ka kala yimid Qeybaha kala duwan ee Bulshada oo ay Huggaaminayaan Duubabka , Culumaau'diinka, cuqaasha , siyaasiyiinta, ganacsatada, aqoonyahannada, Saraakiisha ciidamada, dhallinyarada, Haweenka iyo qurbo-joogta beesha muddullood. Waxaa sidoo kale shirka lagu casuumay marti-sharaf mataleysa beelaha Soomaaliyeed.

Dood qoto dheer, tusaalayn mug leh, dib u milicsi taariikheed oo hufan, su'aalo iyo jawaabo waafi ah oo lagu soo gudbiyay wacdi, hadal jeedin iyo murti ka soo maaxatay rag iyo dumarba, shirku wuxuu soo saaray warmurtiyeed ka kooban qodobbada soo socda:

1:Arimaha Amniga:

- Beelweynta Muddullood waxay ka dalbeysa dowladda federalka,Dowlad Goboleedyada iyo AMISOM in si degdeg

ah looga xureeya degaanada beesha oo ay muddo dheer ku habsadeen nabad-diidka.

- Beesha muddullood waxay si mugleh gacan uga geeysaneysaa xureeynta degaanadeeda, Iyo In la gaarsiiyo Dowladnimo.
- Shirku wuxuu ka digayaa in la soo galiyo dalka Ciidamo shisheeye oo anan sharciyad Haysan kana tirsaneen AMISOM.
- Beesha oo caan ku ah, taariikhna ku leh dhisidda, taageeridda, la shaqaynta iyo garabsiinta dowladnimada ayaa xilliga lagu jiro waxay cod dheer ku sheegaysa jiritaanka tacaddiyo iyo xad-gudbyo culus oo ka jira guud ahaan hay'adaha dowladda dhexdooda gaar ahaanna hay'adaha amniga iyo garsoorka, waxayna ku baaqeysaa in sida ugu dhaqsiyaha badan wax looga baddalo xaaladaha taagan.

2: Arimaha Siyaasadda:

- Shirka wada tashigu waxuu soo dhaweynaayaa Go'aanka Baarlamaanka oo qeexaaya in Gobolka banaadir ku yees13 xubnood oo metelaad Aqalka sare taasoo lagu dhaqn gelinaayo in ay ka mid noqdaan Baarlamaanka 11aad ee 2021 ka, waxaana la codsanayaa in loo dhammaystiro wixii ka dhiman oo Habraac Sharci ah. Waxayna beeshu u mahad celinayasaa dhamaan xildhibaanada labada aqal ee baarlamaanka, Madaxweynaha, Raisalwasaaraha Guddoomiyaha Gobolka Banaadir Iyo cid kasta oo gacan ka geeysatay Arinkas.

- Beelweynta Muddullood waxay u soo jeedineeysa hayadaha Dowladda ay khuseeyso in ay dardar geliyaan howlaha la

xiriira dhameeystirka maqaamka caasimada si waafaqsan soo jeedintii labada guddi ee arrimaga distuurka ee Baarlamaanka 9aad kaasoo dhigaayay in Muqdisho tahay casimadda Dalka oo ah Dowlad goboileed metelaad ku leh labad aqal ee baarlamaanka. Dabagalka howshaan waxuu shirku u xilsaaray Golaha Horumarinta Danaha Mudulood.

- Beesha Mudullood waxay gogol u fidineysaa bulshada somaaliyeed si ay uga wada tashadaan dedejinta dhismaha Dowlad goboleedka Gobolka Banaadir. Daba galka Fulinta goglaha wada tashiga waxuu shirku u xilsaaray Duubabka iyo Golaha Horumarinta Danaha Mudulood.

- Beesha Muddullood waxay ugu baqeeysa Dowladda Federaalka in Doorashooyinka qaranka ee 2020/21 ay noqdaan wadar-oggol suuragal ah oo ku qabsooma waqtigooda. Beesha waxay ka digeysa in muddo kororsi xilliga dowladnimada uu waddanka gelin karo qalalaase siyaasadeed iyo Mid Dastuur taasoo dhaawaceysa sharciyadda dowladnimada Soomaaliya.

- Shirweynuhu wuxuu ka dalbaayaa Dowladda Federaalka Soomaaliya, Dowlad Goboleedyada Iyo Xisbiyada Siyaasaddu in ay dhowraan kuna dhaqmaan ilaaliyaana Dastuurka Iyo Shuruucda Dalka, una turaan Shacabka Soomaaliyeed.

3: Arimaha Bulshada

- Shirku wuxuu soo dhaweynayaa isla markaana xoojinayaa wadajirka Iyo Nabad ku wada noolaashiyaha Bulshada Soomaaliyeed meelkasta oo ay joogaan.

- Shirku wuxuu isku Raacay In la dhiso Golaha Horumarinta Danaba Beel weynta Mudulood.

Shirku wuxuu ku baaqayaa in si shuruud la'aan ah loo joojiyo Colaadaha ka jiro Deegaanada ay dato beeshu si dhab ahna loo xaliyo wixii sababay Colaadahaas, si guudna loo joojiyo Colaadaha ka jiro Soomaaliya.

- Shirku wuxuu Go'aamiyay in la sameeyo Dib u heshiisiin Sal ballaaran, lagana sameeyo dhammaan Deegaanada ay degto Beelweynta Mudulood si loo gaaro is cafin Iyo Iskaashi Guud, Waxayna ugu Baaqaysaa Beelaha Hawiye Gogol Dib u heshiisiineed, sidoo kale waxay ku baaqaysaa Dib u heshiisiin Soomaaliyeed oo dhab ah ayada oo Gogosha dib u heshiisiinta ay u fidinayso Beelaha Soomaaliyeed, Maadaama ay tahay Gogoshii Dalka.

- Shirku waxuu soo dhoweynaa sahminta garoonka cusub ee diyaaradha ee degaanka Hawaay grabcad waxuuna rajeynaa in dhaqso la dhagaxdhigi doono.

- Beesha Muddullood waxay bogaadineeysa dhammaan shirarka nabadeed ay gaareen belaha Somaaliyeed , sidoo kale waxay soo dhoweyneeysaa wadahadallada dib ugu bilowday Somalia iyo Somaliland .

## Gunaanad iyo Mahadnaq

A. Beeshu waxa ay mahad balaaran u soo jeedinaysaa dhammaan intii gacan ka ka geysatay qabsoomidda shirweynaha wada tashiga ah ee beel weynta mudulood

B. Beeshu waxa ay u mahad celineysaa Duubabka dhaqanka, guddigga qabanqaabada iyo culimaa-uddiinkii si gaara ahna

mowlaca macalin nuur oo suura geliyay qabsoomidda shirkaan

.

C. Beeshu waxa ay si gaar ah ugu mahad celineysaa qurba-joogta iyo ganacsatada muddulood oo suura geliyay qabsoomidda shirkan wada tashiga ah,

D. Ugu danbeyn waxa ay beesha u mahad celineysaa -Beesha Caalamka oo qayb weyn ka qaadatay gacan- siinta ummadda Soomaaliyeed waqtiyadii adkaa oo ay soo martay, waxaana ku bogaadinaynaa sii joogtaynta gacan-siinta Ummadda Soomaaliyeed.

<u>Dhammaad</u>